



Maxay yahiin firusyada mindhicirka iyo Firuska Mindhicirka Galo D68

Maxuu yahay firuska mindhicirka?

Fiiruska mindhicirka waa fiirus aad caadi u ah; waxaa jira in ka badan 100 nooc. Waxaa lagu qiyaasay in 10 ilaa 15 malyan qabaan cudurka firuska mindhicirka sannad kasta Mareykanka.

Dad badan oo qaaday cudurka firuska mindhicirka waxay qabaan calaamado qabooban ama waxba, hase ahaatee cudurada qaar, waxay ahaan karaan kuwo culus.

Mareykanka, inta badan cudurada fiiruska mindhicirka waxaa lala kulmaa dhamaadka kuleylaha iyo bilowga qaboobaha.

Maxuu yahay firuska mindhicirka D68?

- Inkastoo firuska mindhicirka D68 (EV-D68) uusan ahayn firus cusub, ma badna sida firusyada kale ee gala mindhicirka. Marka la barbar dhigo firusyada kale ee gala mindhicirka, Mareykanka, mar dhif ah ayaa laga hadlay EV-D68 40kii sanno ee la soo dhaafay.
- EV-D68 wuxuu sababi karaa calaamadaha neefta. Waxay ahaan kartaa wax si gaar ah u culus xagga caruurta qabta neefta ama xaaladaha kale ee adkeeya neefta. Caruurtaan, cudurada EV-D68 waxay keeni karaan in qofka la seexiyo isbitaal.

Maxay yahiin calaamadaha EV-D68?

Firuska wuxuu sababi karaa calaamadaha la midka ah hargabka. Kiisaska qaar, calaamadaha waxay ka baxsanaan karaa qufaca iyo marka xabadka ku xermo ilaa neefta ka adkaato ama neefta la jiiido.

Sidee ayuu ku faafaa firuska EV-D68?

Waxay u muuqataa in EV-D68 ku faafmo marka uu xariir lala sameeyo dhacaanka neefta (qufaca ama hindhisada) dadka cudurka qaaday.

Sidee loo daweyaa EV-D68?

- Cuduro badan ayaa qabooban. Waxay u baahan yahiin daawada loo qaato in lagu dajiyo qofka.
- Dadka dhibaataada darran ku qaba neefsiga waxay u baahan karaan in la seexiyo isbitaalka iyo waxaa lagu taakuleyn karaa daweyn culus.
- Iminka ma jiraan daawo lagu daweyo cudurada EV-D68.

Maxaa laga samayn karaa si looga hortago cudurka EV-D68?

Iminka ma jiraan talaal looga hortago cudurada EV-D68. Samee waxa soo socda si loo yareeyo halista in aad qaadid cudurka EV-D68:

- Caruurta iyo dadka waaweyn ee qaba neefta waa in ay hubsadaan in calaamadahooda neefta la kantaroolo, iyo in ay arkaan bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii ay qaadaan cudurka neefsiga iyo calaamadhooda neefta ka sii daraan.
- Saabuun iyo biyo ku dhaq gacmaha in badan muddo 20 sekan, khaas ahaan kaddib marka aad baddishid xafaayadda.
- Iska ilaali in aad indhahaada, sanko, iyo afka ku taabatid gacmo aadan dhaqin.
- Iska ilaali shumiska, habta, iyo qeybsiga koobabka ama in aad alaabta cuntada lagu cuno la cuntid dad jirran.
- Jeermiga ka dil meelaha la taabto in badan, sida alaabta ilmaha ku cayaarto iyo gacanta albaabada, khaas ahaan haddii u jiro qof jirran.
- Haddii aad xanuunsan tahay, ha tagin xanaanada, dugsiga ama shaqada.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-086
Somali